


Wallaaca



Cabsida iyo wallaaca waa qayb nolosha ka mid ah. Waxaa suuragal ah in aad wallaacdo inta aadan imtixaan qaadan ama marka aad dariiq mugdi ah ku socoto. Wallaaca noocan ah waa mid fiican – waa mid kaaga digaya in aad taxaddarto. Caadi ahaan waxaa uu ku eg yahay marka aad ka gudubto marxaladdii keentay.



Balse malaayiin dadka Mareykanka ah, wallaaca ma uu iska tago, marwalbana waa uu kaba sii daraa. Waxaa suuragal ah in ay qabaan shaf xanuun ama qarow. Sidoo kale waxaa suuragal ah in ay ka cabsadaan in guriga ay ka baxaan. Dadka noocan ah waxay qabaan ciladda wallaaca.

Waxaa noocyada ka mid ah

- Ciladda argagaxa
- Ciladda qofka maskaxda uga taagan
- Ciladda kadeedka ee ay masiibadu keento
- Cabsida
- Ciladda wallaaca guud



Waxaa daaweynteeda ka mid noqon karta daawooyin, iyo hab daaweyn ah ama labaduba.

Text is public domain from the MedlinePlus Health Topics Introductions series. This work is licensed under the Creative Commons Attribution-NonCommercial-NoDerivs License
<http://creativecommons.org/licenses/by-nc-nd/3.0/us>

A Healthy Roads Media project

www.healthyroadsmedia.org

Anxiety (Somali) - Last Reviewed 2009